

Tilmaamaha Deeqaha Soo kabashada Cuntada ee 2021

Soo Koobid:

Sannadka 2021, Dibu-warshadaynta iyo Tamarta ee Ramsey/Washington waxay deeqo siinaysaa ururada danaynaya bilaabida ama balaarinta dadaallada dibu soo kabashada cuntada ee degmada Ramsey - ururinta raashinka dheeraadka ah ee ka yimaada dukaamada raashinka, maqaayadaha, qaybiyayaasha, iyo ilo kasta oo badbaado iyo cunto la cuni karo oo dib loo qaybin karo dadka u baahan. Halbeegyada soo socda ayaa lagu dabaqayaa deeqahaan:

Faahfaahinta deeqda:

- Abaalmarinta way kala duwanaan doontaa, iyadoo kuxiran awoodda iyo baahida
 - Qaddarka abaalmarinta waxay ku salaysnaan doontaa baahiyaha gaarka ah ee soo socda ee ururka (urur kasta wuxuus oo gudbiyaa dalab ay ka mid tahay miisaniyad)
- R&E way la shaqayn doontaa qaatayaasha deeqda si ay u go'aamiyaan jadwalka dibu-bixinta ee waxqabadyada soo kabashada cuntada
- Kharashaadka uqalma waxaa ku jiri doona:
 - Agabka loogu baahan yahay waxqabadyada soo kabashada cuntada, oo ay ku jiraan qalabka ururinta (baaldiyo, sanduuqyo, boorsooyin, iwm.), agabyada ka caawinaya qaadista cuntada (gaari-gacanada, looxaanta, iwm.)
 - Kharashka kaydinta, oo ay ku jiraan kirada iyo/ama qalabka iibsashada kaydinta
 - Kharashka gaadiidka*, oo ay ku jiraan kirada gaariga haddii loo baahan yahay
 - Kharashka shaqaalaha ee la xiriira soo kabashada cuntada/shaqada soo ururinta
- Kharashka aan uqalmin waxaa ku jira:
 - Kharashka shaqaalaha ee aan la xiriirin waxqabadyada soo kabashada cuntada iyo/ama qaddarka ka badanaya 50% oo ah 1 FTE
 - Kharashka shidaalka
 - Kharashaad kasta oo aan la xiriirin soo kabashada cuntada
 - Kharashaadka guud ee hawlgalinta
 - Kharash kasta oo loo arko inaanu muhiim u ahayn waxqabadyada soo kabashada cuntada ee R&E
- Abaalmarinta ayaa lagu dabaqi doonaa waxqabadyada dhacaya inta lagu jiro 2021 ee Degmada Ramsey oo kaliya

Xeerarka

- Deeqaha ayaa u furan ganacsiyada, ururada aan macaash doonka ahayn, iyo ururrada ku salaysan bulshada. Shakhsiyadka iyo ururada dowladda uma qalmaan ka qaybgalka.
- Dhammaan soo kabashada cuntada ee la xiriirta deeqdan waa inay ka dhacdaa Gobolka Ramsey.
- Cuntada la soo ururiyay waa in loo qaybiyaa dadka u baahan, si ku habboon degmada Ramsey. Khaanadaha cuntada, bixiyayaasha raashinka, iyo meelaha kale ee la ansixiyay ayaa ah qaatayaasha la aqbali karo ee helaya deeqda cuntada. Cunto kasta oo la soo ururiyo oo loo arko inay tahay wax aan la cuni karin waa in la bacrimiyo markay suurogal tahay.
- Cuntada la soo ururiyay waa in lagu qaybiyaa bilaash - iibinta alaabada marka la soo ururiyo lama aqbali karo.
- Rasiidhada iyo warbixinnada soo socda waa in la siiyaa si dib loogu bixiyo barnaamijka:
 - Dhammaan agabka la iibsaday
 - Kharashaadka gaadiidka*

- Magacyada iyo goobaha ururada deeqda
- Inta pound ee cunto ee la soo ururiyay
- Magacyada iyo goobaha ururada qaatayaasha ah
- Inta pound ee loo qaybiyay goob kasta oo qaate
- Sharraxaadda sida culayska/qaddarka loo qiimeeyay ama loo go'aamiyay

*Kharashaadka gaadiidka waxaa ku jira soo celinta masaafada iyo kirada gaariga. Kharashka shidaalka lama soo celin karo.